Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 6-aad

Documentiga kalfadhiga 6-aad, kulankiisa:12-aad Tr:20.06.2015

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa:12-aad,saca furi.11:45gh,saca xirt.2:10 gd.

Guntinta:139 xildhibaan.

Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Ansixinta Qaraarka Shilin Soomaaliga**
4. **Ansixinta Qaraar la xiriira Mooshinka Derbiga Xuduuda Soomaaliya iyo Kenya**
5. **Dood Furan: Xaaladda Dhaqaale iyo Maaliyadda Dalka.**

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka furey Guddoomiyaha Golaha Shacabka J.F.S. Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan,waxaa lagu furay Aayadaha

Qur'aanka kariimka uuna akhriyaya Xildhibaan:Maxamed Aamiin

Guddoomiyaha wuxu xildhibaanada u soo jeediyay in ay Ajendaha ansixiyan wey ansixiyeen xildhibaanada.

Guddoomiyaha Golaha,mudanayaal Tr:12.05.2015,waxaa la soo saray Qaraar shilin soomaali ah oo ahaa kan kaliya oo astaanta qaranka ah dadka waxay u oomanyihiin shilin soomaali dagaalkii sokeeye ka dib waxaa khadka ka baxay shilin soomaaliga,waxaa bilowday in lacago been abuur ah la soo galiyo waxayna la mid tahay midka wax qarxinayo iyo in lagu dhaco hantida dadweynaha arintaasna waa in aynu go'aan ka garnaa.

Intaa ka dib waxaa lagu soo dhaweyay, Xogha'yaha Guud ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Mudane:C/kariim Xaaji Buux si uu Golaha ugu hor akhriyo Qaraarka Shilin Soomaaliga.

Asaga oo aad u ogsoon:in shilin soomaaligu yahay astaan kamid ah astaamaha muhiimka u ah muuqaaliya haybadda qarannimo,midnimada umadda iyo shakhsiyadda qaanuuneed ee dowlada door weyna ka soo qaadatay tan iyo markii ugu horeysay Desembar 1962 la soo saaray lacagta soomaliyeed ee warqadda oo ka koobnayd **sh.so.5;sh.so.10;sh.so. 20;sh.so. 100 iyo sanuudeeda kana koobnayd, hal senti ama tano;10senti ama kumi; nus shilin iyo hal shilin iyo lacag warqadeedkii ka dambeysay oo qiimaheedu aha sh.so. 500,ee la soo saaray 1989 iyo sh.so.1000,oo la soo saaray 1990kii.**

Guddoomiyaha Golaha,mudanayaal nuxurka qaraarka waa in taas waad dhageysatan, guddoomiyaha wuxuu sheegey, waxaa is qortay 33xildhibaan,oo doonayso in ay ka doodan qaraarka sh.so. liga

Xildhibaan:Samaan Maxamed Sh.daahir,wuxuu soo jeediyay,qaraarka waxaa la soo gudbiyay 13.05.2015.guddigana waxayu xilsaran hay'ada ku shaqadaleh,waxayna u gudbiyen guddoomiyaha bankiga dhexe,isagana wuxuu yiri waxay u baahan tahay 25malyuun,

Amaanka dowlada ma wada sugna waxa dhici karta kuwa ka soo horjeeda dowlada ay diidan lacagtiina waxay gashay mobil dhibat-o taagan ayay noqotay,guddiga shirar badan ayu yeshay waxayna soo saran in la helo dhaqaale lacag lagu sameeyo shilin soomaliga in la soo xareeyo lacagaha ay haystan dadka gaarka ah hadii uu musalafo si ay dadka u helaan lacag,hadii lacag la soo sameeyo oo la heyn lacag lagu ilaaliyo waxaa imanaysa sicir barar.

Xildhibaan:Faysal cumar guuleed,wuxuu sheegay, aniga waxaan ayidaya guddoomiyaha guddiga maaliyadda ra'yigaas ayan qaba

Xildhibaan:Dr:Cilmi,wuxuu soo jeediyay,hadaysan lacag jirin nolasha qiima maleh,waxan soo jeedinaya in lacag cusub oo ka bedelan tii hore la soo saaro oohalkii dolar u dhiganta shilin soomaali,waxan guddi ahaan soo jeedinayaa in daraasad la sameeyo iyo awood weyn oo lagu ilaaliyo lacagta si dadweynaha u qasarin.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegay,wasiirka arrimaha dibada markii uu joogay bankiga dhexe dhamaadkii 2013kii,ayaa laga hadl-ay arintaan ka dibna waxaa darsay guddiga maaliyada oo u yeer-ay guddoomiyaha bankiga dhexe,waa in guddiga maaliyadda an u dirno si ay wax badan ugu soo daran.

Xildhibaan:Yuusuf Maxamed Cali.wuxuu soo jeediyay,waxaa noo cadaatay in daabacaada lacagta in ayleedahay bankiga dhexe guddiga maaliyadda waxay noo sheegtay in ay san jirin lacag lagu ilaaliyo,waxaa jirta in lo isticmalo electronic, awoodna uma lihin in an joojino,waa in lo dayo dadka ku shaqada leh sida wasaarada maaliydda iyo bankiga dhexe.

Xildhibaan:C/laahi Jaamac,wuxuu shegay,lacagta shilin soomaaliga waxaa u xilsaaran bankiga dhexe deymo badan ayaa soomaaliya ku taagan lacagta waa la isticmala dadka xoolaleyda ayaa isticm-ala bankiga dhexe iyadaa ku shaqaleh waa in ay wax ka qabataa.

Xildhibaan:Shuuriye,wuxuu soo jeediyay,waxaa tagan baahi shilin soomaali oo bulshadena ay tabaneyso wan soo dhaweynayna qaraarkan waxa ku shaqo leh wasaarada maaliyada iyo bankiga dhexe anagana wan ku kontaroleyna.

Xildhibaan:Sahro C/qaadir,waxay sheegtay,canshuurta dalka ma habeysna wana yartahay, wax soo sarka dalka ma fiicna kalsonida dadweynaha wey yartahay,waxa socda dadaal soomaaliya ugu jirto daymihii sidii loo cafin lahaa anaga garaar ma gari karno.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,macnaha mahan hada shiln soomaali halakeno qararrkan wuxuu oranaya bankiga dhexe waa in uu howl gala guddiga maaliyada waa in ay daba gasho xukuumadana wa in ay howlgasho waa in taas.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yusuf,wuxu soo jeediyay,qaabka nuxur-ka waa in la sameya isbedel, dowlada shilin wey u baahan tahay dadweynaha had iyo goor wey cabanayan waa in loo daayo cida ku shaqada leh.

Xildhibaan:Maxamed C/lahi Fadhayo,wuxu soojeediyay,waxan la qaba xildhi. Iga horeyay hala loo daayo cida shaqada ku leh Qo.111 ee guddiyada madaxa banan ayay ku jirta bankiga dhexe anaga malihin .

Xildhibaan:Maxamed C.Dalxa,wuxuu sheegay,lacagta hada waxay ku soo ururtay (1000 shilin) oo ka dambeysa waa astantii qaranka wa tala lacagta sudan ayaa hada ka hor dabacday,arintas waxaa is kaleh xukuumada.

Xildhibaan:Axmed Ducaale Xaaf,wuxu soo jeediyay, waa muqadas in la keeno lacagta sh.so. bankiga dhexe waxa la sameyay 1972dii waxaa la dhigi jiray dahab oo lacagta lagu ilaalin jiray dhibaatada ugu weyn waa shilinka hadii dhaqaalaha lumo waa mushaakil.

Xildhibaan:Mahdi cali Cusman,wuxu shegey,hadan nahay guddiga

Maaliyadda waan la kulanay guddoomiyaha bankiga dhexe wuxu noo cadeyay in an lacag la soo daabici Karin sida xaga amniga,iyo hadii dhaqaalaha hoos u dhaco in lahaysto keyd lagu ilaaliyo.

Xildhibaan:Cabdala Boss Axmed,wuxu soo jeediyay,arintan hada ka hor waa laga hadlay ha lo dayo cida ku shaqada leh yan magac xumo barlamaanka loo soo jiidin,an u yerno wasiirka wasaarada ma aliyadda iyo guddoomiyaha bankiga dhexe.

Xildhibaan:Guure,wuxu sheegay,waa loo bahan yahay shilin so.yaa ka masu'l ah lacagta taalo sudan inta an la cagtas la keenin waa in lagu soo celiyaa lacagta hada taalo hadii lacag cusub la soo daba co waxay kenaysa sicir barar, waxa maalin dhaweyt la kenay warq-ado ay ku qoran yihiin 35malyan oo aan laga bixin mushaarka marka taas macnaheeda waxay cadey naysa in bankiga dhexe uu ka madax banan yahay xukuumada.

Xildhibaan:Siciid Maxamed Cali,wuxu soo jeediyay,lacag in la same yo baahi weyn ayaa loo qabaa,lacagta la sameynayo waa mansa bka soomaali ay leedahay waa in lala wadaago gobolada oo loo dad badsado la tashina la sameyo.

Xildhibaan:C/qaadir Aadan CC,wuxu sheegey,howshan waxaa iska leh bankiga dhexe,waa in aan tixgalina bur-burkii ka dhacay dalka si taxadar leh in loo dhiso ayay u bahan tahay,faah-faahintii uu bixiy ay guddoomiyaha bankiga dhexe wuxu noo sheegay inaan la hayn lacag lagu kontarolo tii la kenayay iyo tii talayba dhaqaalaha wad anka ma habeysna waxan leyahay lacagta tala sudan in aan marn aba la soo galin wadanka lacagtaas.

Xildhibaan:Ibraahim Ilka Cas,wuxuu soo jeediyay, xeer hoosadka ku ma qorna in guddoomiyaha golaha uu soo saaro qaraar shilin so.wa loo bahan yahay lacag in la sameyo dhibaato ayaa loo qab,waxa u madax banan bankiga dhexe.

Xildhibaan:Aweys C/laahi,wuxuu sheegay,hadii la rabo in lacag la sameyo waxaa loo bahan yahay in la soo ururiyo tii suuqa ku jirtay

Waa jirtaa in la baraarujiyo cida shaqada ku leh,waa in la soo diyari yaa shuruucda guddiga maaliyadda.

Xildhibaan:Shuuriye,wuxuu soo jeediyay,dowlada in ay leedahay da raasad qaraarkan waa in la gudbiyo marka shuruucda la soo ururi-yo waayo baahi aya jirta xaga shilinka soomaaliga.

Xildhibaan: **Shariif Maxamed Cabdala**,wuxu sheegay,lacagta hala sameyo balse bankiga ma u dhameystiran yahay shuruudihii laga rabey wayo bankiga lacag ma hayo waxan qaba in laga noqdo arrintaan.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi Kaamil,wuxuu soo jeediyay,qaraarkan wax macno ah ma sameynayso sharciga wa yalaa lacag sameynt bankiga dhexe ayaa u xil saran lacag manta lama sameyn karo lacagta sudan dhib ayay kenaysa,qaraarkan waa in lala laabta.

Xildhibaan:Aabi,wuxuu sheegay,waqtigan lacag lama soo daabici karo sab-abo jiro awgeed iyadoo laga duulayo midnimada golaha dib aynu u celino qaraarkan.

Xildhibaan:Cabdiraxmaan Suge,wuxuu soo jeediyay,lacagta an dooneyno waa in aan ogaana nooca ay tahay raas caseyr ilaa raas kamboni waa in lacagtaas laga isticmaalaa si isku mid ah.

Xildhibaan:Bishaar Ugaas,wuxu sheegey,wadanka waa federal waxaa jira statedyo dalka wuxuu u baahan yahay in shilin lahelo bankiga dhe xe uu soo daabaco,waxaa wadanka soo galay dhaq-dhaq aaq lacag been abuur ah ayaa la soo wada wadanka maqaadi karo.

Xildhibaan:Cabdi Bare,wuxu soo jeediyay,waa loo bahan yahay sh.so. balse lama joogo waqtigeeda waxaa soo baxay 37 milyan oo musuq-maasuq ah lagama hadlin guddi walba shaqo ayuu lee yahay waa in lagu ixtiramaa waxan qabaa in guddiga dib loogu celiyo,ee aan ka hadalno 37milyan iyo darbiga la dhisayo .

Xildhibaan:Taaw,wuxu sheegey,waxan qabaa doodan in ayna munaasab ahayn bankiga ma joogo,wasaarada maaliyadda ma joogto waa in lagu dhiiri galiyo kuwa ku shaqda leh si lacagtas dib ugu soo noqoto oo ah astanta qaranka.

Xildhibaan:Goodir:wuxu soo jeediyay,majirto lacag rasmi ah waxa yaalo oo dhan waa falso waa muhiim in la sameyo lacag rasmi ah waxa shaqeya EVC ,waa in laga dhigaa sh.so.

Xildhibaan:Cabdi ladiif Sanyare,wuxu sheegay,qaran aan lahayn lacag qaran maahan,mashaqeyn karo waxa muhiim ama halo dhiibo guddigi ama cidii ku shaqada lahayd waa in la meel mariyaa qaraarkan.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,qaraarkan waxaan diyaariyay kalfadhigii hore shacabka ayaa ka qeyliyay fundayaasha,xoolaleyda I.W.M Waxaan rabaa in mar walba la keeno golaha lana ogaado halka ay mare-yso, guddiga maaliyadda wan u gudbiyay, aniga wan iska laabi karaa balse yaynan gacantiina ka bixin haloo gudbiyo guddiga maaliyadda.

1da jun waxaa la keenay mooshin ay soo saxiixan 35 xildhibaan darbiga ay Kenya ka dhisayso xuduuda soomaaliya, taas oo meel ka dhac ku ah qar-animada umada soomaaliyeed waliba dhulka soomaaliya sida uu noo sheegay Guddoomiyaha Balad Xaawo,waxa la soo jeediyay barlamaanka in uu talaabo ka qaado,waxan dhihi lahaa dowlada Kenya in ay darbi dhisato suurta gal maahan la mana ogolaan karo waxna ma tarayo waxna kaama reebayo fariin adag ayaan u direynaa UNka inan ogolan Karin umana dul qaanadeyno dhulkeena in leyska dhisto.

Xildhibaan:Maxamed Cabdi Yusuf,wuxu sheegay,**1961dii,**Afrikan union wax-ay go'aan ku gaartay in gumeysiga soomaaliya loo daayo soomaaliya ayaa diiday hadana waxay rabaan in bada soo galan oo ceelkii ugu weynaa oo batroolka qaatan yaynan ogolaanin sanadkii **1983dii,** wafdi dabal dag Kenya ayaan ka mid ahaa,waxaa la yiri xuduuda ha naloo kala calaameyo waxan niri ma jirto xuduud noo kala yaala oo noo dhaxeya, Waxaa loo bahan yahay in aan soo saarno qaraar adag aynu kaga soo horjeedno darbigaas manta anagey noo taala.

Xildhiban:Dalxa,Guddoomiye ku xigeenka Arrimaha Dibada,wuxu soo jeedi yay,Barlamaanka carabta waxey soo sartay Qaraar oo cambareyn ah in

derbiga uu yahay mid qaldan,waxaa la idinka rabaa in aad ayidaan waxa ku shaqaleh guddiga arrimaha dibada ee kuma shaqo laha 5ta guddi aad tiri waa loo magacabaya qararkii ay soo saaren Barlamaanka carabta,wax aa inoo akhrinaya xogha'yaha guddiga arrimaha dibada.

Xildhibaan:Aweys C/laahi,Xogha'yaha Arrimaha Dibada,wuxu soo jeediyay waxaan cambareynaynaa darbiga ay ka dhisayso Kenya iyo biyaha badda oo ay leedahay soomaaliya iyo kheyradkeeda si ay ku gaarto dhaqaale qaraarkaas ay soomaaliya ka soo jeedisay jaamacada carabta waxaa taageeray dowlada mareykanka iyo ingiriiska xildhibaano waxan idiinka codsanayaa in aad ayidaan qaraarkan.

Xildhibaan:Guure,wuxuu soo jeediyay,waxaan u hambal yaynayaa Dalxa iyo Aweys, oo taabtay meeshii la rabey,waxan dhihi lahaa in loo yeero wasiirka arrimaha gudaha iyo wasiirka arrimaha dibada iyo Rai'sal wasaaraha xukuumada F.Soomaaliya waxaa soo baxay darbi leyska dhisanayo iyo dad leyska xasuuqayo.

Xildhibaan:Maxamuud Cali Dhuux,wuxuu sheegay,wan ayid sanahay Dalxa iyo aweys cabdulahi, nimanka saxiixay badda Rai'sal Wasaaraha ka mid ah ee hala keeno yaynaa xag-xaganin dadka nala dariska ah.

Xildhibaan:Cabdi Xaashi C/laahi,wuxuu soo jeediyay,sanadkii **2007dii,**ayaa barlamaanka la keenay ajnabi Ugandha iyo Burundi,ka dib dal walba ciidan buu keen saday ciidamada Kenya anagoon sharci siinin ayay wadankeena yimaadeen sanadkii **2009** kii,go'aankii yaalay aya RODMP

Lagu soo dhax qariyay waxaana loo bixiyay dhaxal dhowr hadana waxan maqlayaa badii soomaaliya maxkamad ayaa la geeyay halkaa waxa ina taagay waa qabiil, waan idiinkaga mahad celinaya go'aanka mideysan oo ad qaadateen oo ah diidmada darbiga sharci darada ah dalka yaga inagoo nool in la qaato maya.

Kalfadhiga 6-aad, Kulankiisa:12-aad, uu shir Guddoominayay,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 2:10 gd.